## Seearagudub (Trespass)

### Waa maxay seeragudub dambiyeedku?

Seeragudub dembiyeedka ayaa dhici karta markay dad soo galaan mulkiyad iyaga oo aan loo oggolayn inay meesha soo galaan, ama waxa dhacda marka dadku ku xadgudbaan shuruudaha lagu soo galo mulkiyad.Shuruudaha soo galitaanka ayaa ah qodobbada iyo xeerarka waafaqsan kaas oo xubnaha shacabka guud ay ku gali karaan mulkiyad khaas loo leeyahay.

### Waa maxay Seeragudub Dembiyeedka Darajadda 1aad?

"Qofku wuxuu dambiile seeragudub heerka koowaad ku yahay haddii isagu ama iyadu ogaan si sharci-darro ah u soo galaan ama u joogaan *dhisme* dhexdiis."SMC 12A.08.040.A.1 (Nuuxnuuxsi la raaciyay.)

"Seeragudub dembiyeedka heerka koowaad waa falxumo dhexe."SMC 12A.08.040.A.2.Ciqaabta ugu badani waa 364 maalmood oo xabsi ah iyo $5,000 oo ganaax ah.

### Waa maxay Seeragudub Dembiyeedka Darajadda 2aad?

"Qofkuu wuxuu dembiile ku yahay seeragudub darajadda labaad haddii isagu ama iyadu ay ogaan si sharci-darro ah ugu soo galaan ama ugu joogaan *dhisme* dad kale leeyihiin hoostooda duruufo aan ka dhignayn seeragudud dembiyeed heerka koowaad."SMC 12A.08.040.B.1 (Nuuxnuuxsi la raaciyay.)

Seeragudub dembiyeedka heerka labaad waa falxumo fudud.SMC 12A.08.040.B.2.Ciqaabta ugu badani waa 90 maalmood oo xabsi ah iyo $1,000 oo ganaax ah.

### Waa maxay difaaca ku waafaqa leh ee seeragudub dembiyeedka?

SMC 12A.08.040.C ayaa dhigaya:

> Dembi ku oogid kasta oo hoos timaad SMC 12A.08.040 A ama B, waa difaac ku waafaq leh marka:
>
> 1. Dhismaha khuseeya dembi hoos yimaadda Qaybta 12A.08.040 la iskaga guuray; ama

2. Dhismaha oo markaa u furnaa xubnaha shacabka oo qofka falka ku kacay u hogaansamay shuruudaha sharciga ah ee lagu soo rogay gelidda ama joogidda goobta; ama

3. Fal ku kacaha oo si macquul ah u aamminsanaa in qofka iska leh goobta, ama qofka awoodda loo siiyay u fasaxa soo gelidda goobtaas, ayaa u fasixi lahaa isaga ama iyada inuu soo galo ama joogo meesha; ama

4. Fal ku kacaha oo isku dayayay inuu raaco habsocod sharciyeed, oo ay ka mid yihiin dukumenti walba oo loogu baahan yahay ama loo oggol yahay in la guddoonsiiyo dad ama mulkiyad sida u qabo xeer, sharci, qodob, nidaam, ama amar maxkamadeed marka laga reebo kuwa lagu keeno boostada Maraykanka. Difaacan ayaa arrinta khuseeyaa kaliya haddii ficil qaaduhu uusan galin hoy gaar loo leeyahay ama dhisme aan u furnayn dadwaynaha oo soo-gelitaanka dhismaha ay ahayd mid macquul u ah oo lama huraan u ahayd adeegida habsocodka sharciyeed.

**Waa maxay shuruudaha caadiga ah ee lagu soo galo mulkiyad ganacsi?**

Shuruudaha soo galitaanka ayaa ah xaaladaha iyo shuruudaha waafaqsan kuwaas oo ah inay xubnaha shacabka guud ay ku gali karaan badanaa mulkiyadda ganacsiga ah.  Xaaladaha iyo shuruudaha  waxa ka mid ah:

- Waa inuu ahaado macmiil ama ka adeegte;
- Waa inuuna qofku ku xadgudbin sharci kasta oo u yaala  Xeerka Dawladda Hoose ee Seattle; ama Xeerka  Wax Laga Beddalay ee Washington; iyo
- Waa inuu qofku galay saacadaha meheradda.

**Maxaa ku dhacaya qofka ku xadgudba shuruudaha soo-galitaanka?**

Shakhsiyaadka hela ogeysiiska shuruudaha soogalitaanka, ha noqoto calaamad, qoraal ama hadal ahaan, oo u bixiyo qof awood u leh inuu ilaaliyo shuruudaha soo-galitaanka, oo markaa kaddib qofkaas ku xadgudbo shuruudaha soo-galitaanka waxaa lagu xiri karaa seeragudub dambiyeed.Sida caadiga ah, si kastaba ha ahaatee, dadka xadgudubka sameeya ayaa marka koowaad digniin loo siiyaa inay ku xadgudbeen shuruudaha soo gelitaanka ama u mudnaantooda ay ku jogaan mulkiyadda lala noqday, oo waxa la siiyaa fursad ay kaga tagaan goobta kahor intii aan la xirin.Haddii ay sii wadaan xadgudubka oo ay diidaan shuruudaha soo

galitaanka ama ay diidan inay ka baxaan meesha marka laga codsado, waxa lagu xiri karaa seeragudub dambiyeed.

## Barnaamijka Heshiiska Seeragudubka

### Waa maxay Barnaamijka Heshiiska Seeragudubka?

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada Seattle iyo Waaxda Booliska Seattle, oo la shaqeeya Mashruuca Farqiga wayn ee Jinsiyeed, ayaa soo saaray habraacyo cusub si wax looga qabto arrimaha seeragudubka ee horyaal beesha.Barnaamijka Heshiiska Seeragudubku waa heshiis ka dhexeeya kuwa mulkiyadda gaarka u leh, meheradha iyo waaxda booliska si loo maamulo shuruudaha soogalitaanka mulkiyadda gaarka loo leeyahay.

Kuwaa waxa ka mid noqon kara in dadka laga mamnuuco mulkiyadda gebi ahaanba, ama waxay ku lug lahaan kartaa in dadka loo fasaxo inay soogalaan mulkiyadda iyada hoos timaada shuruudaha qaarkood.Shuruudaha lagu hirgalin karaa Barnaamajka Heshiiska Seeragudubka ayaa ku qoran yihiin heshiisyada oo waxay ku dhejisan yihiin dhismaha.Iyaga oo heshiiska la saxeexda Waaxda Booliska Seattle, mulkiilayaasha ayaa oggol inay saraakiisha boolisku u digaan oo xiraan dadka ku sii wada ku xadgudubka shuruudaha markayna joogin meesha mulkiilayaashu.

### Guryaha gaarka loo leeyahay miyay isqori karaan inay ka qaybqaataan Barnaamijka Heshiiska Seeragudubka?

Maya, guryaha gaarka loo leeyahay iyo aqallada guriyeynta qoysaska badan ayaan uqalmin Barnaamijka Heshiiska Seeragudubka, haddii aan la deggenayn mooyee.Mulkiyadaha sida caadiga ah u furan shacabka guud ayaa ka mid noqon kara Barnaamijka Heshiiska Seeragudubka.

### Waa maxay mas’uuliyadda mulkiilaha markii la eego barnaamajka Seeragudubka?

Mulkiilayaasha waxaa saaran xilal badan oo lagu soo koobay heshiiskan.Gaar ahaan, mulkiilayaashu waa inay ku dhejiyaan calaamado dadka u sheegaya shuruudaha soogalitaanka mulkiyadda, oo waa inay kala shaqeeyaan dambi ku oogga dadka lagu eedeyay seeragudubka ama dembiyo kale.Meesha ay calaamaddu ku taal iyo digniinteeda ayaa muhiim u ah dambi ku oogidda guulaysata.Mulkiilayaasha ayaa lagu dhirrigalinayaa inay kala shaqeeyaan saraakiisha SPD iyo Xeer Ilaaliyaha Xiriirinta Saldhigga Booliiska (Precinct Liaison Attorney) si loo hubiyo in in mulkiyadoohoodu si habboon loo saxeexay.

## Sidee ayaan Isku Qoraa Barnaamajka Heshiiska Seeragudubka?

Mulkiilayaashu waa inay la xiriiraan saldhigooda booliis si ay u heelaan foomka ogolaanshaha seeragudubka.Sidaas waxa lagu samayn karaa mid uun qof ahaan adiga oo taga saldhigga laftigeeda ama adiga oo u mara iimayl.Waxaad ku hagaajin kartaa dhammaan su'aalaha ku saabsan barnaamijkan cinwaanada iimayl ee soo socda:

NPrecinctTrespassProgram@seattle.gov

WPrecinctTrespassProgram@seattle.gov

SPrecinctTrespassProgram@seattle.gov

SWPrecinctTrespassProgram@seattle.gov

EPrecinctTrespassProgram@seattle.gov

## Ayaa bixin kara Digniinta hoos timaad Barnaamijka Heshiiska Seeragudubka?

Mulkiyadahan hoos yimaad Barnaamijka Heshiiska Seeragudubka, sarkaal waaxda booliska ah, ama wakiil ka socda mulkiilaha ama kirayste u haysta fasax gacan ky haynta shuruudaha soogalidda ayaa ugu digi kara shaqsiyaadka inay ku xadgudbeen shuruudaha soogalitaanka oo wixii xadgudubyada mustaqbalku waxay ku dambayn doonaan xiritaan.Markay tahay mulkiilaha gaarka u leh ama kiraystaha kaas oo u sheega shakhsiga shuruudaha soogalitaanka ama kala noqoda u mudnaanta shakhsiga joogitaanka mulkiyadda, mulkiilahaasi gaarka u leh ama kiraystahaasi waa inuu kala shaqeeyaa dambi ku soo oogidda kiiska seeragudub dembiyeedka.

## Miyay dhacdaa u digidda seeragudubku?

Maya, marka qofka loo sheego shuruudaha soogalitaanka oo la ogeysiiyo inay ku xadgudbeen shuruudahaas, digniintu ma dhacayso.

**Miyuu mulkiilaha hoos yimaad Barnaamajka Heshiiska Seeragudbka wali u diidi karaa shakhsiyaadka mulkiyaddiisa?**

Haa, dhammaan sharciyada khuseeya seeragudubka dambiyeed ayaa wali sii jiri doona oo mulkiilaha ayaa wali qofka u diidi kara mulkiyaddooda ilaa inta uu leegyahay wakhti kasta oo ay doonaan.Qofka leh awoodda uu ku sharraxo shuruudaha soogalitaanka ama la noqoshada u mudnaanta joogga mulkiyadda ayaa ah inuu maxkamadda markhaati ka noqdo in isagu ama iyadu la noqday mudnaanta uu ku joogo mulkiyadda oo qofkaasi diiday inuu ka baxo ama u ku soo noqday mulkiyadda.Milkiilayaasha ayaa lagu dhirrigalinayaa inay ku sameeyaan diiwaano faahfaahsan isdhexgalaka ay la yeesheen dadka ku seeragudbay mulkiyaddooda, khaasatan haddii qofkaas uu ahaa qof ay u diideen inuu soo galo meesha.

**Miyay bixin karaan mulkiilayaasha aan ka qaybqaadan Barnaamajka Heshiiska Seeragudubka digniinta seeragudubka?**

Mulkiilayaasha sida gaarka u leh mulkiyaddooda ee aan ka qaybqaadan Barnaamajka Heshiiska Seeragudubka ayaa samaysan kara habraacyo ay iska leeyihiin si ay u maamulaan shuruudaha soo galitaanka mulkiyaddooda.Si loogu guulaysto dambi ku oogidda, waa in qofka awoodda u leh gacan ku haynta shuruudaha soogalitaanka iyo dib ula noqoshada u mudnaanta joogga mulkiyadda u markhaati furo inay ahayd qofku (1) inuu ogaa ama ay waajib ku ahayd inuu ogaado shuruudaha soo galitaanka, (2) ku xadgudbay shuruudaha soo galitaanka ama lala noqday mudnaantooda soogalitaanka mulkiyadda, iyo (3) qofku wuxuu diiday inuu joojiyo akhlaaqda sharci darrada ah ama u ka tago ama u ku soo laabtay mulkiyadda kaddib markii mudnaanta lala noqday.Mulkiilayaasha ayaa lagu dhirrigalinayaa inay ku sameeyaan diiwaanka faahfaahsan isdhexgalaka ay la yeesheen dadka ku seeragudbay mulkiyaddooda.

**Miyay saraakiisha xiri karaan dadka xadgudubayaasha ee ay siiyeen digniinta seeragudubka mulkiilayaasha aan hoos iman Barnaamajka Heshiiska Seeragudubka ?**

Haa, dhammaan sharciyada seeragudubka dambiyeed ayaa sidooda ahaan doona.Saraakiisha ayaa leh ikhtiyaarka inay xiraan dadka ku xadgudba seeragudubka dambiyeed oo ku sameeya mulkiyad kasta ha ahaatee markay haystaan qofka soo cawday ee la shaqayn leh lana xaqiijin karo, kuwaas oo ay ka midka yihiin mulkiyadaha aan hoos iman barnaamijka seeragudbka.

**Maxaa eedeyn dambiyeed lagu soo oogi karaa kuwa ku xadgudubka barnaamijka seeragudubka?**

Seeragudubka Dambiyeed ee Darajadda 1$^{aad}$ (dhisme gudahiis ) – falxumo dhexe; ciqaabta ugu badani waa:364 maalmood oo xabsi ah iyo $5,000 oo ganaax ah.

Seeragudubka Dambiyeed ee Darajadda 2$^{aad}$(dhismaha ka baxsan) – falxumo; ciqaabta ugu badani waa:90 maalmood oo xabsi ah iyo $1,000 oo ganaax ah.

**Barnaamijkan seeragudubku miyuu beddelayaa sharciyo seeragudub dambiyeed haatan jira midkoodna?**

Maya, Barnaamajka Heshiiska Seeragudbku ma beddelayo sharciga la dejiyay.Saraakiisha ayaa wali xiri kara dadka ku xadgudba sharciga SMC 12A.08.040 (Seeragudubka Dambiyeed) ee mulkiyadda gaarka loo leeyahay iyada oo aan loo eegin haddii uu jiro heshiiska digniin seeragudub haddii uu qof awood u leh dejinta shuruudaha soogalitaanka ama la noqoshada mudnaanta soogalitaanka mulkiyadda uu horay shakhsiyaadka ugu siiyay digniin xadgudubka seeragudubka oo u ku markhaati furi doono.

## <u>Barnaamijka Seeragudubka Xadiiqadaha (Parks)</u>

**Waa maxay Barnaamijka Seeragudubka Xadiiqadahu (Parks)?**

Barnaamijka Seeragudubka Xadiiqadaha magaalada ayaa la mid ah Barnaamijka Heshiiska Seeragudubka.Waaxda Xadiiqadaha ayaa qaatay xeerarka dhaqanka loogu talagalay xadiiqadaha Magaalada oo ku dhejiyay xadiiqadaha

qaarkood.Waaxda Booliska Seattle, Askarta Xadiiqadaha, iyo kuwa kale ee u magacaaban kormeerada Xadiiqaduha ayaa sharrixi doona shuruudaha soogalitaanka oo siin doona digniinta seergudubka dambiyeed shakhsiga ku xadgudba Xeerka Xadiiqada, sharciyada kale ee deegaanka, ama sharciga gobolka.

Intaa waxa u dheer, askarta xadiiqada ayaa u qori kara dambi ku eedaynta ku xadgudubyada gaarka ee Xeerarka Xadiiqada, oo saraakiisha ayaa laga yaabaa inay qoraan dambi ku eedaynta madaniga ah ee Xeerka Dawladda Hoose ee Seattle ama Xeerka La Beddalay ee Washington ama laga yaabaa inay u xiraan dadka falal dambi ah.

**Miyaa Barnaamijka Seeragudubka Xadiiqadaha loo isticmaali karaa dhammaan mulkiyadaha Xadiiqada?**

Haa, Barnaamijka Seeragudubka Xadiiqadaha ayaa loo isticmaali karaa dhammaan mulkiyadaha Xadiiqada.

**Miyay digniinta seeragudubka xadiiqaadu dhacdaa?**

Maya, digniinta seeragudubka xadiiqaadu ma dhacdo.

**Maxaa ku dhacaaya shakhsiga ku xadgudba Xeerka Xadiiqada kaddib marka la siiyo digniinta seeragudubka dambiyeed?**

Haddii qof la siiyo digniin seeragudub oo u diido inuu ka tago ama joojiyo dhaqanka sharci-darrada ah ama dib ugu soo noqdo mulkiyadda Xadiiqada oo u ku xadgudbo sharciyada ama xeerarka kale, qofkaas waxaa lagu xiri karaa seeragudub dambiyeed.

**Sidee qof loogu hor-joogsan karaa inuu soo galo Xadiiqada?**

Askariga Xadiiqa iyo Sarkaalka Booliska Iska Hortaagooda:

Haddii dhaqanka ficil ku dambeeyay digniin seeragudub ay abuurto halis daran oo ah dhaawac jirka ah ama waxyeello mulkiyad, qofka ayaa markaa laga saari karaa oo loo diidi karaa xadiiqada maalinta inta ka harsan.

Haddii dhaqanka ficilkiisu u wato dambi culus ama ku xadgudub xeerarka hubka, qofka ayaa markaa loo diidi karaa illaa hal sano soogalida mulkiyadda Xadiiqada.

Ka Hor-Istaagyada Maxkamaddu Amartay:

Muddada xukunka danbiilanimada, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada ayaa garsooraha ka codsan kara inuu ku soo rogo Amar u Dhawaan La'aan xadiiqad gooni ah ama xadiiqado badan.Amarka u Dhawaan La'aanta waxaa dhici karta in uu dhaqan galo:

- Marka qofka dambiga lagu qaado;
- Iyada oo shuruud u ah ka sii dayn xabsi inta la dhammeystirayo arrinta dambiga; ama
- Marka la xukumayo, iyada oo qayb ka mid ah xukunka ama shuruud u ah sii daynta tijaabada ah.

**Maxaa ku dhacaya shakhsiga soo gala ama sii jooga xadiiqad kaddib marka loo diido muddada wakhtiga u diiditaanka?**

Marka laga reebo Dib u Habaynta Kowaad ee hadalka, shakhsiga kasta oo soogala ama sii jooga xadiiqad horay loogu diiday ama laga saaray ayaa dhici karta in la xiro oo lagu qaado seeragudub dhambiyeed.